# Heerka Isla Xisaabtanka 2016 ee Soomaaliya

February 7

2017

Sanadka 2016 waxaa dhacay musuqmaasuq aanan joogsi laheyn oo gaaray heerka ugu sareeyay. Mushaar bixinta waa la joojiyay, dhulalka dawladdane waa la iibiyay si loo maal geliyo doorashada ugu laaluushka sareeya ee taariikdha bani'aadamka. Sanada 2017 waxaa kor u kici doona musuqmaasuqa heer dhexe iyo midka heer hoose ah, iyadoo la xadi doono gargaarka loogu talo galay abaaraha.

## Musuqmaasuq Bilaa Xuduud

## Contents

Warbixinta oo Kooban ... 2
Hordhac ... 3
Qaabka warbixinta loo ururiyay ... 3
Doorashda Federaalka ee Soomaaliya: August 2016 - February 2017 ... 4
Cabsi gelin iyo handadaad ... 4
Laaluush ... 4
Oday dhaqameedka ... 4
Ergooyinka ... 5
SIEIT ... 5
Tirooyin aanan caqli gal aheyn oo lagu kala guuleeystay ... 6
Xalinta Khilaafaadka ... 6
Doorashada madaxweynaha ... 6
Musuqmaasuqa Wazaaradaha ... 7
Wazaradda Arrimaha Gudaha ... 8
Wazaaradda Difaaca ... 9
Wazaaradda Caafimaadka ... 10
Wazaaradda Cadaaladda ... 10
Wazaaradda Amniga Gudaha ... 11
Dhulalka Dawladda oo La Boobay ... 12
Ganacisga Nin Jecleysiga Leh ... 12
Mushaar Bixin La'aanta ... 13
Waxyaabaha 2017 La Filan Karo ... 13
Soo jeedin ... 14

## Warbixinta oo Kooban

Sanadka 2016 waxay aheyd sanadka ugu xun ee islaxisaabtanka ee Soomaaliya iyada oo jileyaasha siyaasadda ay doonayeen in ay isticmaalaan hab walba ay ku guuleeysan lahaayeen doorashada dadban. Shaqaalaha rayidka ah iyo booliska iyo NISA mushaar lama siin7 bilood; sidoo kale ciidamada xoogga dalka waxaa mushaar laga joojiyay dhammaadki 2015; $100 oo ay gunno u bixiyaan dawlado Soomaaliya la saaxiibka ah ayaa ugu danbeeyay bilowgi 2016 da. Musharka oo aanan la bixin waxaa dheeraa, dawladda Soomaaliya waxay iibisay dhulalka dawladda, iyadoo ula dan leh in ay ku taageerto doorashada dad ka tirsan xisbiga talada haya iyo madaxweynaha.

Sidaasi awgeed, doorashada waxaa hareeyay musuqmaasuq baahsan. Marki ay ergooyinka diidaan in ay sameeyaan sida la amro waa la bedelaa, la cabsi geliyaa, ama la toogtaa sida ka dhacday labo doorasho oo kala ah Galmudug iyo HirShabelle. Waxaa intaa sii dheer in dad laga saaray tartanka kadib dhiig ay ku daadiyeen goobta doorashada ayaa loo oggolaaday in ay baarlmaanka ku soo biiraan kadib doorasho dhoodhoob ah oo loo qabtay.

Dhaca baahsan ee loo geeystay qasnadaha dawladda si loogu maalgeliyo ololaha doorshooyinka dadka qaar, amniga faraha ayuu ka baxay 2016. Ciidamad amniga burcadinamada ayay ka qeeyb qaateen si ay naftooda u maareeyaan, taasi oo aad u wiiqday amaanada dadweynaha dawladda kala dhaxeysay. Baad, dhac, dil, iyo jirdil ayaa ka mid ah inta kabadan 500 warbixino ay dadweynaha marqaati u soo gudbiyeen, intooda badan oo la xiriira ciidanka ammaana.

Maadaama uu doorashada dhammaaday, sanadka 2017 wuxuu arki doonaa musuqa heerka sare oo wax yar yaraada, cid walba ee guuleeysata. . Si kastaba ha ahaatee, musuqmaasuq aad u weeyn oo ah heer dhexe iyo heer hoose aya dhici doona marki uu bilowdo gargaarka baniaadannimada ah ee abaaraha loogu talo galay. Dad aanan mushaar qaadan bilooyin badan ayaa la dhihi doonaa mas'uul ka noqdo cunno qeybis. Haddii aanan la siinin waxa ay xaq u leeyihiin, kuwooda u fiican xitaa dhaca ayay ka qeeyb qaadan doonaan.

In kastoo 2017 ay tahay fursad musuqmaasuqa lagula dagaalami karo, maadaama musharraxiinta guuleeysan kara ay musuqmaasuq ayaa la dirireynaa dhaheen, waxaa loo baahan yahay in sare loo qaado ka qeybgalka dalbashada in daah furnaan iyo kormeer ay ku sameeyaan hawlaha dawladda hay'ado aan dawlo aheyn oo madax banaan.  Taageereyaasha Somalia ee caalamiga ah waxaa saaran xil gooni ay oo ay u hayaan dadkooda si ay u ogaadaan halka ay ku baxdo canshuuraha dadkood laga soo qaado.

Haddii aanan musuqmaasuqa wax laga qaban waxaa kordhayo taageeri la'aanta iyo sharciyad xumida dawladda, taasi oo kordhin doonta amni darrida iyo qulqulka dhalin yarada ka carareysa urur argagaxiso oo dhan ah iyo dawlad tuugnimo ku dhisan oo dhan kale ah.

# Hordhac

marqaati waxay soo saartay warbixinteeda ugu horeeysay ee sanadka 2016 iyada oo ka duuleeysa ujeedadeeda a in ay musuqmsuqa ka baabi'iso heer walba ee dawladda federaalka iyo dawladaha hoose ah. 2016 waxay aheyd sanad ee marqaati heshay in ka badan 500 warbixin ku saabsan musuqmaasuqa oo ka yimid dadweynaha caadiga ah oo meel walba ka shaqeeya ha ahaadaan dawlad ama shacab.

Sido kale waxay aheyd sanad ay dadweynha Soomaaliyeed sare u qaadeen ka hadalka musuqmaasuqa kadib dadaalo marqaati ay u gashay in ay ku wacyi galiso arrintaan iyadoo ula jeedo in ay dhisto dhaqan diidan musuqmaasuqa.

Musuqmaasuqa waxyy bangiga aduunka u yaqaanaa 'ka faa'iideeysiga xafiis guud si loo helo faa'iido gaar ah', waxaana ka mid ah laaluush qaadashada iyo dhiibista, qaraabo kiil, wax is daba marin iyo baad.

Haddaanan laga hortagin musuqmaasuqa wuxuu saameeyn weyn ku yeelan doonaa bulshada Soomaaliyeed. Wuxuu hadda wiiqayaa dadaalada loogu jiro dhisidda dawladnimada, wadatashaiga, xukunka sharciga, iyo sidoo kale wuxuu duminayaa nolosha iyo xuquuqda bani'aadannimada isagoo taageero u ah amni darrida iyo burcadnimada. Musuqmaasuqa Soomaaliya wuxuu sida ugu weyn saameeyaa kuwa bulshada ugu liita maadaama lacagaha loogu tala galay horumarka la leexsanayo.

Saameeynta dhaqaala waa laba: mida koowaad, waxay wiiqeeysaa awoodda dawladda ay ku sameyn laheyd adeegyada aasaasiga ah, iyadoo daa'imeeysa sinnaan la'aanta iyo cadaalad darrida ay la kulmaan dadweynaha Soomaalida maalin walba. Mida labaad, waxay dhiiri gelisaa in dunida aysan dalka maal gashin ama aysan kaalmo siinin.

Shaqadaeena, dagaalkeena, iyo go'aankeena anagoo hiigsaneeyna, marqaati waxaa u muuqata Soomaaliya oo musuqmaasuqa ka noqdo wax la hilmaamay oo musuqa nidaam looga hortagayo laga dhisay hay'adaha dawladda dhammaantood.

waxaan ku eegeeyna musuqa kala duwan ee dhacay 2016, kuwaasi oo aasaaska u dhigay waxyaabha la rabo in la qabto si loo helo doorasho xor ah oo dadweynaha dhammaantood ka qeeyb galaan 2020, lana xoojiya hay'adaha dawladda. Musuqa doorashada iyo kan dhulalka ayuu eegi doonaa warbixintan si uu u sawiro sawir cad oo ku saabsan musuqa Soomaaliya.

## Qaabka warbixinta loo ururiyay

Warbixintan waxay ku saleysan tahay wareeysiyo, su'aalo, warbixino laga helay dadka codeeya, shaqaale ka tirsan ololaha doorashooyinka, musharaxiin, oday dhaqameed, shaqaalaha dawladda, iyo dadweynaha guud.

Int kor waxaa u dheer, warbixintan waxay ku salaeysan tahay 500 macluumaad oo ay dadweynaha marqaati u soo direen iyagoo soo marsiinya Aaladda Islaxisabtanka Soomaaliyeed.

# Doorashda Federaalka ee Soomaaliya: August 2016 - February 2017

Geedi socodka doorashada dadban waxaa saameeyn xun ku yeeshay jileyaal tiro badan oo ka soo bilaabanaya heer federaal, dawlad goboleed, ilaa musharraxiinta qaarkood. marqaati waxay heeysaa cadeeymo la taaban karo oo ku saabsan laaluush, cabdi gelin, bedelid liisaska ergooyinka iyo khiyaano cad oo wiiqday sharciyadda in badan o ka mid doorashooyinka heer baarlamaan.

## Cabsi gelin iyo handadaad

marqaati waxay bisha December wareeysatay 47 oday dhaqameed iyo musharaxiin baarlamaan ee jooga Muqdisho, Koonfur Galbeed, Galmudug, Puntland, iyo Jubaland. 26% waxay yiraahdeen waxaan la kulannay handadaad iyo cabdi gelin ka yimid musharaxiin iyo madax siyaasadeed ee doonaya kuri baarlamaan.

Caadooyinka cabsi gelinta ee aan aragnay waxaa u badnaa in lagu qasbo musharaxiinta in ay ka baxaan tartanka iyo in loo diido in ay soo galaan goobta doorashada ay ka dhaceyso. Tan danbe waxay si badan uga dhacday Jubbaland iyo Koonfur Galbeed.

## Laaluush

Laaluush bixinta heer walba ayay ka jirtay doorashada iyadoo ah mid nidaameeysan oo caadi laga dhigay. Laaluushka waxaa lala eeganayay inta badan saddex kooxood oo kala ah oday dhaqameed, ergooyinka, iyo State Indirect Electoral Implementation Team (SIEIT) oo qaabilsanaa doorashooyinka heer gobol. Codka ugu lacagta badnaa wuxuu gaaray $30 kun, waana midka ugu lacagta badan taariikhda doorashooyinka. Tusaale ahaan, Hillary Klinton waxaa ka baxay $20 cod walba oo ay heshay.

### Oday dhaqameedka

32% ee oday dhaqameedka ah waxay qireen in ay laaluush arkeen si walba ha ku timaadee. Odayaasha waxaa loo beegsanayay maadaama ay gacanta ku hayaan liisaska ergooyinka iyagoo awood u leh in ay bedelaan. Arrintan waxay keentay in odayaasha la laalusho si ay liiska ugu daraan ama ka saaraan ergooyinka ay doonaan musharraxiinta, iyadoo mararka qaar lacag lagu siinayay in ay musharrax uu soo xusho 50 ergo isaga daacad u ah.

Tusaale ahaan, marqaati waxay heysaa cadeeymo la taaban karo ee ku saabsan oday dhaqameed la siiyay $150,000 si uu u sameeyo liis ergooyin u daacad ah hal musharrax. Liiska waxaa la bedelay 4 jeer, iyadoo laga saarayay ergooyinka loo arko in aysan daacad u aheyn musharraxa laaluushka bixinayay.

Baaritaan kale waxaan ku ogaanay in ololaha madaxweynaha hadda xilka haya, Hassan Sheikh, ay siiyeen $100,000 oday dahaqameed si uu u sameeyo liis ergooyin daacad u ah musharrax ay

wataan, musharraxaas oo codkiisa siin doono madaxweynaha kadib marki uu heelo kursigiisa baarlamaanka ah. Ergayga ay marqaati wareeysatay wuxuu sheegay in uu helay $200 oo aad uga yar inti loo ballan qaaday.

In ay laaluushaan odayaasha oo ay saameeyn ku yeeshaan ergooyinka waxay siineeysay jileyaalka siyaasadeed awood ay ku saameeyaan natiijada, waxayna aheyd mid ka yar lacagta ku bixi laheyd in ay gataan ergooyin hore loo soo magacaabay. Tusaale ahaan, waxaa dhacday in musharrax HirShabelle uu ku guul dareystay tartan isagoo bixiyay $20,000 codkiiba, oo ah hal milyan dollar 50ka cod.

### Ergooyinka

39% ee ka tirsan odayaasha iyo musharraxiinta waxay qureen in ay marqaati ka ahaayeen laaluush la siinayo ergooyin. Ergooyinka waxaa lagu laaluushay ku dhawaad doorasho walba ee gobol walba. Marki marqaati ay weeydiisay sbabta ay in kabadan 300 kun dollar ku bixinayaan laaluush, qaar ka mid ah ololaha ayaa sheegay in lagu doonayo sharaf, xasaanad, iyo in ay doortaan madaxweynaha cusub iyagoo lacagta sidaas ku soo celin doonaa.

### SIEIT

SIEIT in kastoo ay marmar wax ka qabteen musuqmaasuq, mararka qaar si toos ah ayay uga qeeyb qaateen inti ay socotay doorashada.

Mararki ay odayaasha laaluush qaateen si ay u bedelaan liisaska ergooyinka ah, marqaati waxay ogaatay in SIEIT yada ay jabiyeen mid ka mid ah nidaamka xaqiijinta ah ee loo igmaday, sida ku cad warqadda SIEIT lagu aasaasay:

*‘’ d) Xaqiijinta liisaska ergooyinka: "SIEIT waxay xaqiijin doontaa in liiska ay soo gudbiyaan odayaasha uu yhay liiska lagala tashtay qeeybaha kala duwan ee beesha. FIEIT waaa in ay xaqiijisaa in uu dhacay wadatashi ku saabsan liiska".*

marqaati waxay gacanta ku dhigty cadeeyn muujineysa in hal oday ee ka socda Somaliland la laaluushay afar jeer si uu u bedelo liiska ergooyinka. SIEIT Somaliland waxay xaqiijisay liiska lakin uma aysan gudbin liiska u danbeyay FIEIT iyadoo jabisay nidaamka saxda ahaa.

26% ka mid ah odayaasha iyo musharraxiinta waxay sheegeen in ay arkeen ama la kulmeen SIEIT oo laluush qaadaneeysa. Sidoo kale musharraxiinta yaa si toos ah u laaluushay SIEIT si ay liiska kaga saaraan ergooyinka mucaaradka ku h.

SIEIT yada waxaa loo laaluushay in ay sameeyaan waxyabo madow sida in ay bedelaan jadwalka doorashada iyagoo aanan wargelin siinin qaar kamid ah musharraxiinta,

Arrin walaac badan oo ay marqaati aragtay ayaa ahaa xaqiijin la'aanta ergooyinka. Waxaan aragnay in 2% kamid ay doorashooyinka ay ka qeeyb qaateen dad aanan aheyn beesha tartanka laheyd. Sidoo kale waxaan aragnay dad labo tartan laga qoray oo ka codeeyay. Waxaa laga

yaabaa tirada noocan oo kale ah iyo lacagta laaluusha ahba in ay aad uga badan tahay inta ay marqaati qiyastay.

## Tirooyin aanan caqli gal aheyn oo lagu kala guuleeystay

Tiro laga naxo ee musharraxiin ah oo ku guuleeystay in ka badan 80%, iyo qaar badan oo ku guuleeystay 100% – taasi oo ah arrin aan tirakoob ahaan suurtogal u aheyn haddii ay tahay doorasho xor ah oo sinnaan ay jirto. Tirokoobka hadii loo eego, waxaa la rabaa in tartamada intooda badan lagu kala badiyo 1 cod iyo ugu badnaan saddex meelood laba, marar aad dhif u ahna dadka qaar ay helaan 80% iyo kabadan.

Qiimeeyn aan ku sameynay 98 tartan, waxaan aragnay 89 tartan ee uu midka guuleystay uu helay 78.4% ama kabadan, oo ay kamid yihiin 58 qof oo heshay inta u dhaxeysa 84% iyo 98%, laba kursi aanan loo tartamin (kuwi ka soo horjeeday daqiiqada u dambeysay ayey si shaki leh u tanaasuleen); iyo 15 waxay heleen 100% ee codadka

Tani micnaheedu waxa weye in kabadan 76% musharraxiinta waxa ay heleen inta u dhaxeyso 84% ilaa iyo 100%, mana ahan arrin caqligal ah




## Xalinta Khilaafaadka

Shaqsiyaal laga mamnuucay in ay ka qeeyb qaataan doorashooyinka kadib marki ay goobta doorashada ka abuureen cunfi gaaraya dil iyo dhaawac ayaa arrimo siyaasadeed awgeed loogu ogolaaday in ay dib u tartamaan iyagoo dhammantood February 2016 ku guuleeystay doorashooyinka dib loo qabtay, Doorashooyinka lagu celiyay kama sharciyad yareen kuwi hore ee dhiiga ku daatay oo laaluush ayaa si waali ah loo bixiyay.

## Doorashada madaxweynaha

Dadka ugu cadcad doorashada oo ay ka mid yihiin midka hadda xilka hayo waxay sheegeen in ay qorsheeynayaan in musuqmaasuqa ay la diriraan haddii la doorto. Tani waxaa ka horimaanaya

ficiladooda maadaama ay intooda badan qorsheeynayaan in ay lacag badan ku isticmaalaan doorashada oo ay xildhibaanada laaluushaan.

marqaati waxay sidoo kale heshay cadeeymo sheegaya in laaluush $500-$1000 ah la siinayay qaar kamid ah xildhibaanada si ay musharraxiinta madaxweynaha u buuxiyaan shuruudaha ahaa 20 xildhibaan in ay ka heystaan saxiix. Tani waa arrin walaac leh iyadoo tusaale u ah in laaluush ballaaran la kala qaadan doono doorashada madaxweyne, iyadoo wararka qaar ay sheegayaan in beeca uu maraya 50 kun ilaa 100 kun dollar, hadba saameeynta xildhibaanka uu leeyahay.

In kastoo ay dhici doonto in laaluush la kala qaato, uma badna in ay ku filnaan doonto in ay weeciso xildhibaanada, iyagoo u codeeyn doona cidda ay rabaan. Tani waxay ka cadahay hadalo aan la yeelanay qaar kamid ah xildhibaanada oo sheegay in ay madaxweynaha lacag ka qaadan doonaan maadaama uu yahay shaqsiga ugu bixint badan, lakin ay u codeyn doonaan musharrax kale.

Sidoo kale marqaati waxay daba kici doontaa musharrax walba oo guuleeysta kaasi oo ballan qaaday in uu la dagaalamo musuqmaasuqa ama dib uu u soo celiyo hantida la dhacay.

## Musuqmaasuqa Wazaaradaha

Waxaan helnay 782 warbixin ee ku saabsan musuqmaasuqa oo ka yimid shaqsiyaal ka shaqeeya wazaaradaha iyo dadweynaha si toos ah ula kulay musuqmaasuq ama indhahooda saaray. Midda tooska ah waxaa loo fahmi karaa in ay tahay la kulanka musuqmaasuqa ka yimaada dadka u shaqeeya dawladda ee shaqadooda tahay in ay sharciga hirgeliyaan sida booliska iyo maxkamadaha.

Cabashada Musuqmaasuqa ee Wazaaradaha




Sawirka midigta ku xusan wuxuu muujinayaa tirada musuqmaasuqa ee ka helnay wazaarad walba isaga oo cadeeynaya wazaarad walba inta cabasho ay ku leedahay cabashooyinka guud. Inta badan waxaa laga soo cabtay wazaaradaha Arrimaha Gudaha (MOI), Wazaaradda Gaashandhigga (MOD), iyo Wazaaradda Amniga (MoIS)

Sababo badan ayaa arrintan dhaliyay. Waxaaradahan ayaa u kuwa ugu waaweeyn waxaana kamid ah booliska, taraafikada, iyo NISA. Waxay metelaan xiriirka ugu weeyn ee u dhaxeeya dadweeynaha iyo dawladda.

Sidoo kale waxay la'yihiin nidaam sharciyeeysan oo maamula shaqooyinkooda iyo awoodooda, iyadoo aysan jirin kormeer xaqiijiya inaysan dhicin musuqmaasuq iyo tacaddiyo ka dhan ah dadweeynaha. Intaan oo la isku daray ayaa saameeyn baabi'in ah ku yeelanaya bulshada Soomaaliyeed iyadoo xoojineeysa bay'ad ku wacan musuqmaasuq.

Waxaan helnay warbixino aanan badneeyn ee ka yimaada wazaarada maaliyada sababtane waxa waayay dadweynaha intooda badan lama macaamilaan. Kuwa la macaamilane, sida kuwa dakhliga ururiya, musuqmaasuqa halkaas ka dhaca labada dhinac ayuu faa'iido u leeyahay sidaasi daraadeed waxaa yar cabashada ina soo gaarta. Musuqmaasuqa halkaas ka dhaca waxaa ka mid ah ka dhuumashada canshuur bixinta, ka been abuurka risiit yada, iyo leexinta lacagaha la soo ururiyo.

## Wazaradda Arrimaha Gudaha

marqaati waxay heshay 232 warbixino ku saabsan musuqmaasuqa ee ka yimid wazaaradda arrimaha gudaha, taasi oo ah 47% cabashooyinka musuqmaasuqa ee aan helnay sanadka 2016.

*Booliska iyo Ciidkanka Wadooyinka*

Musuqmaasuqa aan ka helnay wazaaradaan 79% waxay la xiriirtay musuqmaasuq ay ku kaceen booliska, waxayna kala ahaayeen sidatan:




1. ‘’Laaluush’’ –.Handadaad lagula kacayo gawaarida dadweynaha oo laga qaadayo inta u dhaxeyso nus dollar ilaa 5 dollar, iyo gawaarida waaweeyn ilaa $50.

2. Dhigashada isbaarooyin sharco darro ah oo laaluush lagu qaato.

**Kiis Daraasadeed 1:**‘ Waxaan ahay wiil dagan degmada Kaaraan waxaana jiraa 23 sanno waxaan si aad ah oga cabanayaa ciidanka dowladda Soomaaliya anoo booqasho u aaday maamo habaryartay ah oo ku nool xaafada suuqa xoolaha ayey ciidanku ila dhaceen qori baadkiis xaga dambe ee dhabarka hadana iiga yaal nambro aad u waa weyn qoriga oo weynaa darteed, waxaan dambi geestay ma jiraan waa iska kay dileen. Sababta waxey dheheen waan ka shakinay. Dowladda Soomaaliya ciidamadeeda xaq miyey u leedahay inay garaacdo qof walba oo ay ka shakido taas ayaan waydiin"

**Kiis Daraasadeed 2:**‘ Waxan ahay inan maskiin ah deegaanka waa muqdisho, waxana jiraa 38 sanno. ah waxaan leega dilay gabadheyda waxaana iga dilay labo nin oo ka tirsan askarta

dawladda; qaasatan booliska degmada C/casiis iyo saddex nin kale. Waxaana u dacwooday saldhigga booliska waxaana dulyimi ciidanka C.I.D-ga kana qaatay sawirro meydkii. Kadibna aan ka waayey C.I.D inay ii baaraan kiiska gabadhayda. Waxan kasoo jeeda puntland

**Kiis Daraasadeed 3:** ‘’ Waxan ka cabanaa askar ka tirsan Ciidamada jooga Suuqa Bakaraha oo ay dileen gabar maskiin ah madaxa ayey xabadana kaga dhacday. Dowladda waxaa laga rabaa in ay Ciidanka shacabka dilaaya in ay Maxkamad soo saaran oo waxay mudan yihin la marsiiyo."

**Kiis 4: "** Waxaan ka cabanaa askari dowlada ka tirsan oo baabuurta shacabka ka qaato lacag boosteejada laga raaco baabuurta waana isgooska zoope gaar ahaan boosteejada madina aado. Deegaankeyga waa muqdisho gaar ahaan zoope, Da'deydana waa 22 sano waxaan ahay lab."

Sida kor ka muuqato, cabashooyinka aan helno ee la xiriira booliska iyo taraafikada waxay salka ku hayaan isbaarooyin iyo arxan darro lagula kaco dadweynaha. Iyagoo ku mashquulsan dhaca dadweeynaha ayaa waxaa hor mara gawaari aanan la baarin haddii ay lacag iska bixiyaan.

Baaritaan 29 maalin socday ee marqaati ka sameeysay isbaarooyinka Muqdisho ayay ku aragtay in meelaha ugu isbaarada laaluushka badan ay ahaayeen xaafado amni darrida ay sare u kacday. Xiriir toos ah ayaa ka dhaxeeya isbaarada iyo amni darida.

## Wazaaradda Difaaca

Musuqmaasuqa ka dacaga waxaaradda difaaca waa mid naxdin leh oo nidameeysan, In ka badan 228 warbixin ee ku saabsan wazaaradan, 97% waxay ahaayeen askar ka tirsan militariga oo laga cabanayo dhac iyo tacaddi ay dadweynaha u geysteen.

Musuqmaasuqa militariga waa 26% warbixinada aan helnay guud ahaan, taasi oo ka badan wazaaradaha cadaaladda iyo tan amniga.

**Kiis 1:**

‘Waxaan ka cabanayaa ciidanka militariga oo dadweynaha ku dhca xaafada shirkoole xilliyada habeenki ah. Waxay dhacaan mobeylo, laptop yo iyo waxyaabo kale. Waxay leeyihiin arrimo amni darteed ayaa waxaan u qaadeeynaa mana soo celiyaan’’

**Kiis 2:** ‘’Waxaan ka cabaneyna askar katirsan cidanka dowlada gaar ahaan meleteriga oo isbaaro soo dhoobtey inta udhaxeysa Afgooye iyo wanlaweyn. deganka albaraka da.da 20 lab



**Kiis 3:** 'Waxaan ka cabaneyna askar katirsan cidanka meliteriga oo dhac ka geysta xafadaha katirsan bulo xubey xiliga habeenki : deganka albaraka da.da 20 lab''

**Kiis 4:** '' Maanta waxaan arkay dad masaakiin ah oo ku nool cooshado oo la jirdilayo''

**Kiis 5: "** Waxan ahay wiil oo jooga xafada Suuqa Xoolaha amaanka xaafada ayaa ah mid aad u liita lamaha amaanku kuma guulaysan inay wax ka qabtaan amniga suuqa xoolaha. Shacabka iyo laamaha amaanka ayaa ah kuwa aan isku xirneen, waxaan codsanayaa in laamaha amaanka inay ka sameystaan shacabkooda kalsooni si amniga uu u hagago"

Sida kor ka muuqato dadweynaha iyagoo ka cabanaya musuqmaasuqa hadane waxay rajeynayaan in xiriirka ay dawladda la leeyihiin in uu wanaagsanaado si naftooda ay ku hormariyaan.

## Wazaaradda Caafimaadka

Warbixino badan kama aysan imaan wazaaradaan maadaama shqadeeda iyo xiriirka ay dadweeynaha la leedahay ay aad u liidato.

**Kiis 1:** ''Waxaan ka cabanayaaa musuqmaasuqa shaqo helidda. Waxaan heystaa shahaado, anigoo ku guuleeystay imtixaanka shaqada ayaa shaqadeeyda la siiyay qof kale. Waxaan deganahay Wardhiigley. ''

Musuqmaasuqa wuxuu badiyaa dareenka ah in aysan waxba soo fiicnaan doonin, taasi oo ah dareen keeni kara in dhalinyarta ay ku biiraan burcadnimada.

## Wazaaradda Cadaaladda

Musuqmaasuqa aad ayuu ugu xidideeystay wazaaraddan qaasatan garsoorka. Hay'adi la rabay in ay ahaato midda hormuudka ka ah la dagaalanka musuqa ayaa ah tan ugu horeeysa ee dhiiri gelisa.

Somalia malahan garsoor hufan oo xaqiijin kara in sinnaan iyo cadaalad ay dhacdo, waxaana aad u saameeya laaluush, cabsi gelin, handadaad, iyo dad aanan u qalmin shaqada loo igmaday.

Cabashooyinka ugu badan ee aan ka helno wazaaradan waxay la xiriiraan dhulalka iyo laaluush lagu xiro furidda kiisaska.

**MOJ Corruption Complaints 2016**



**Kiis 1:**‘’Waxaan ka cabanayaa Maxkamadda Gobola Banaadir oo 150 dollar iiga qaadatay furidda dacwad iyo 30 dollar warqad loo qoro dacweeysanaha iyagoo aanan i siinin warqadda lacag bixinta ah"

**Kiis 2:"** Waxaan ka cabaneynaa maxkamadda degmada hodon oo aanan xukun sax ah rideynin iyadoo xukunka u rida qofki laaluush bixiya’’




## Wazaaradda Amniga Gudaha

Militariga kadib, hay'adda nabadsigidda qaranka ee NISA ayaa ah midda ugu musuqmaasuqa badan ee hay'adaha dawladda.

**Kiiska 1:**

‘Waxaan ka cabaneynaa ciidanka NISA ee bakaaraha jooga oo dadka dhaca xilliyada habeenki ah’’

**Kiis 2:**

‘Waxaan ka cabaneynaa ciidan NISA ah oo na weeyiistay laaluush anaga oo saaran gaari caasi ah oo hadda Kenya ku sii jeedno

**Kiis 3:**

‘’Waxaan ka cabaneynaa ciidanka NISA ee jooga airport ka Muqdisho kuwaasi oo dalbanaya laaluush gaaraya $150 si ay u fududeeyaan warqadda dembi la'aanta ah si aan visa Kenya u dalban lahaa."

Waxaa kor ka cad in hay'adaha ammaanka ah ee aanan bixin mushaaraadka in ay yihiin kuwa ugu musuqmaasuqa badan. Mushaaraadka oo si toos ah loo siiyo waxay keeni doonto in ay si aad ah hoos u dhacdo arrimaha kor ku xusan, lakin waqti ayay qaado doontaa in ay aasaaska ka saarto musuqmaasuqa. Hadda, bay'adda iyo dhaqanka NISA waa mid ku haboon musuqmaasuqa.

Su'aal kale oo is weydin mudan ayaa ah maxay tahay sababta NIS si toos ah ay dadweynaha ula macaamileeyso oo viisooyinka u soo saareeyso. Waa in safaaradaha ay la shaqeeyaan Hogganka Socdaalka Soomaaliyeed, iyadoo Hogganka Socdaalka ay sameeyneeyso wixi baaritaan ah iyadoo laamaha amniga kaashaneeysa. Arrinta kor ku xusan waa tusaale wanaagsan ee baahida loo qabo in la kala cadeeyo awoodaha iyo shaqooyinka laamaha dawladda iyo dihisidda hay'ado kormeer ee xaqiijiya in aysan dhicin ku tumasho awoodeed.

## Dhulalka Dawladda oo La Boobay

Wixi ka danbeyay 2012, dhulalka dadweynaha si aanan laheyn daah furnaan ayaa iibiyay. Waxaa dhulalkan ka mid ahaa dhulal ay laheeyeen wasaarado, dawladaha hoose, ciidanka asluubta, hoteelo dawladeed, iyo iskuulo. Meelo magaca weyn waxaa kamid ah Hotel SYL, Uruba, Akademiyada Filimada, Bangaariyada, keydka shidaalka, iyo meelo kale. Waxaa ka sii yaab badan arrintan, dhulal shaqsiyaad ay lahaayeen oo ay dawladdu la wareegtay 'arrimo amni awgeed' kadibne lagu wareejiyay dad madax sare ka ah dawladda ama dad ay saaxiibo yihiin oo ganacsii ka dahxeeya.

Sanadk 2016 dawladda waxay sidoo kale iibisay barxadda Tarabuunka iyo qeybo kamid ah Hargaha iyo Saamaha. Nidaamka loo maray ma aheyn mid xalaal ah oo daah furn; marqaati waxay ka war heshay arrintan marki ay la soo socodsiiyeen dad dawladda katirsan.

marqaati waxay si adag u dalbaneysaa in dawladda Soomaaliya ay soo bandhigto faahfaahinta geedi socodka loo maray iibinta dhulalka dawladda iyadoo sheegeeysa magacyada buuxa ee dhammaan dadka arrintan ka faa'iiday oo dhulalka lagu wareejiyay.

## Ganacisga Nin Jecleysiga Leh

Kontrakt yada dawladda waxaa la siinayay dad ay qaraabo, saaxiibo, ama la shaqeeysto madaxweynaha Soomaaliya. Inta badan musuqmaasqa noocaan ah wuxuu ka dhacay Muqdisho, oo ah halka dawladda Soomaliya ay si toos ah inteeda badan gacanta ugu heyso.

Waxaa la sameeyo sharikado qabta shaqooyin jira oo dawladda qabato si loogu naas nuujiyo dadka madaxda xiriirka la leh. Tusaale ahan, sharikada Sahal Handling Services (SHS) waaxaa la aasaasay bartamihii 2016 si ay u qaado dadka raba in ay airportka aadaan. Sharikada waxay degan tahay dhul dawladeed oo ayada la siiyay kuna yaalo KM, rugta NISA ay jidgooyada ku leedahay agteeda. Askarta NISA waxay dadweynaha ka dejinayaan gawaarida ay saaran yihiin iyaga oo ku qasbaya in ay fuulaan basab SHS ay leedahay oo gaaraya $11 ilaa airport ka oo ah meel isku muuqata, xittaa haddii dadweynaha ay gaari gooni ah wataan. Dadka dawladda ka shaqeeya ama laamaha amniga xiriirka la leh laguma qasbo arrintan, taasi oo kordhineysa naceybka dadweynaha ay u qabaan dawladda iyo laamaha amniga.

SHS waxaa maamula ganacsato xiriir dhaw la leh madaxweynaha, waxaan ka mid ah Cali Sheikh oo la dhashay madaxweynaha. Cali Sheikh iyo marwada madaxweynaha waxay yihiin dad uu madaxweynaha ku qarsado lacagaha uu dadweynaha ka leexsaday. marqaati waxay si adag u dalbaneysaa in baaritaan lagu sameeyo lacagaha ay sameeyeen ehelada madaxweynaha afarti sano ee la soo dhaafay si loo ogaado kuwa madaxweynaha lacagta u qariya iyo kuwa kale.

Dawladda sidoo kale waxay dhul siisay shirkadda Simatech oo Dubai xarun ku leh, dhulkaasi oo airport ka wuqooyiga ka xiga. Dhulkan oo qaar ka mid ah lahaay dadweyne, loogana qaaday 'arrimo amni awgeed', waxay Simatech ka furtay deked qalalan. Adeegyada dhulkaas lagu hayo waxaa lagu sameyn karay dekedda Muqdisho oo leh dhul baaxad leh; dekedda qalalan baahi kuma imaan waxaana loogu talo galay in lagu naas nuujiyo taageerayaasha iyo ganacsatada xiriirka la leh madaxweynaha.

## Mushaar Bixin La'aanta

In ka badan 7 bilood mushaaraad ma aysan siin dawladda shaqaalaha rayidka ah. Waxaa iyaga ka daran qaar ka mid ah ciidamada ammaanka oo qaarkood sida SNA oo mushaar la siin 18 bilood, in kastoo dawladaha Soomaaliya caawiya ay gunooyin siiyeen 9 bilood kahor. Sida caadada aheyd afarta sano ee la soo dhaafay, mushaarka aanan la bixin sanadka marki uu dhamaado lama bixin doono abad.

Sababta aanan mushaarka loo bixin ma aheyn laacag la'aan - waxaa sanadki canshuur soo gasho dawladda dhexe 180 milyan dollar sida uu sheegay wasiiru dawlihi hore ee maaliyadda. Sababta aanan mushaar loo bixin waxa weye doorashada awgeed. Dakhliga iyo kheyraadka dawladda sida dhulalka waxaa loo suuq geeyay in lagu maal geliyo xubnaha taageersan madaxweynaha xilka haya ee u tartamayay kursiyada siyaasadeed sida kor loogu falanqeeyay. Sidoo kale, lacag badan ayaa meel loo dhigay si madaxweynaha uu doorashada ugu iibsado codad ku filan uu dib ugu soo laabto doorashada.

Mushaar bixin la'aanta waxay keentay in ay hoos u dhacdo shaqo tagidda ee shaqaalaha rayidka ah, iyo dhaqdhaqaaq la'aan ee laamaha amniga ah. Laamaha amniga waxay noloshooda ku maareeyaan burcadnimo, sida aan hore u sheegnay oo dadweynaha cabashooyinka ku soo gudbiyeen, ama waxay waardiyeyaal ka yihiin guryaha dadka ay qaraabada yihiin haddii ay ka xishoonayaan burcadnimo. Tani waxay keentay in niyad jab uu ku baaho dhammaan shaqaalaha dawladda taasi oo u sabab ah shaqo xumi, musuqmaasuq, iyo amni darri.

## Waxyaabaha 2017 La Filan Karo

In kastoo sanadki hore ay ugu xumeyd taarikhda isla xisaabtanka, waxaa u sabab ahaa doorashooyinka. Cid walboo guuleeysata, musuqmaasuqa heer sare sanadkan wuu yaraan doonaa. Dhammaan dadka musharraxiinta ah oo ay u badan tahay in ay guuleeystaan waxay ballan qaadeen in musuqa la dagaalamaan, taasi oo ah fursad lagula xisaabtamo in ay ka dhabeeyaan ballamadooda sanadkanne uu noqdo mid musuqa dib loogu riixo.

Abaaraha iyo majaacada laga yaabo in ay dhacdo waxay keeni doontaa in ay kor u kacdo musuqmaasuqa heer dhexe iyo mid heer sare ah. In tani laga hortago waxay u baahnaan doontaa in dadka lacagtooda ku bixin doona gargaarka ay dalbadaan in ay dhacdo isla xisaabtan heer sare ah.

## Soo jeedin

Si loo xaqiijiyo in musuqmaasuqa baahsan ee 2016 uusan dib u soo noqon sanadkan, marqaati waxay soo jeedineeysaa in la qabto waxyaabaha soo socda:

- Dhammaan dhulalka dawladda ee sharci darrida lagu bixiyay waa in dib loo soo celiyaa oo dawladda la wareegtaa.
- In dastuurka la hirgeliyo oo la dhiso guddiga la dagaalanka musuqmaasuqa.
- Waa in la dhisaa guddi gooni u ah baaridda musuqmaasuqa 2016da awood xarigne leh
- In la qaadaa tilaabooyin lagu xaqiijinayo in dadweeynaha ay codeeyaan sanadka 2016da.
- Dalalka sheegay in ay maxkamadeeynayaan dadka baasabooradooda haysta ee musuqmaasuqa ku dhacay waa in ay ka dhabeeyaan ballantooda.
- Cid walboo doorashada madaxtinmada ku guuleeysata, waa in daah furnaan iyo isla xisaabtan lagu xiro kaalmo walbo oo dawladda Soomaaliya la siiyo.